# LIISKA HUBINTA KORONTADA GURIGAAGA

National Energy Action waa ha'adda qaran ee qaabilsan maareynta shidaalka iyo hufnaanta korontota. Xaashidaan waxay kugu hagi doontaa kaalmada dhaqaale ee la heli karo iyo tallaabooyinka wax ku oolka ah ee aad qaadi karto si aad uga caawiso in gurigaaga uu dareemo kulayl iyo korontotaada ay noqoto mid la awoodi karo.



# XOGAHA LIISKA HUBINTA


**LA HADAL SHIRKADAADA KORONTOTA** pg 02
Haddii aad ku dhibtooneyso kor u kaca biilashaada korontota kala hadal shirkadaada

**QAADO MITIRKA KORONTADA AKHRIYA EE CAADIGA AH** pg 02
Qaado mitirka korontada akhriya ee caadiga ah si uu kaaga caawiyo helida kharashka saxda ah

**DIIWAANKA ADEEGYADA MUDNAANTA LEH (PRIORITY SERVICES REGISTER, PSR)** pg 03
Joogitaanka diiwaanka micnaheedu waa in shirkadaadu ay ogtahay inay mudnaan ku siinayso

**GURIGA SI AMMAAN AH U JOOG** pg 03
Hubi in qalabka ay si joogto ah u uu u eego injineer aqoon u leh

**HAKU DHUMIN LACAG** pg 04
Xaqiiji inaad helayso dhammaan dheefaha aad u qalanto

**QIIMO DHIMISTA KORONTOTA IYO LACAG BIXINTA** pg 05
Hubi haddii aad xaq u leedahay qiimo dhimista guriga ee diiran iyo lacagta bixinta shidaalka ee waqtiga qaboobaha

**WAXTARKA KORONTOTA** pg 06
Isbadelada yaryar waxay saameyn weyn ku yeelan karaan biilasha

**GUURISTA GURIGA IYO TAMARTAADA** pg 07
Waxa la sameeyo marka aad ka guureyso una soo guureyso gurigaaga

**WAXA LA SAMEEYO HADDII SHIRKADAADA KORONTADA SHAQADA GANACSIGA ISKAGA BAXDO** pg 08
Ha welwelin, sharciga ayaa hawsha geli doona

**ILAHA FAA'IIDO LEH IYO KHADADKA CAAWIMAADA** pg 09
Raadi liiska ururada ku xusan warqada oo dhan

# LA HADAL SHIRKADAADA KORONTOTA

Haddii aad ku dhibtooneyso ka faaideysashada biilashaada korontota, ama aad bilowdo inaad dib ugu dhacdo lacag bixinta oo lagugu yeesho deyn, runtii waa muhiim inaad la hadasho shirkadaada sida ugu dhakhsaha badan ee suurtagal-ka ah. Waxay awoodi doonaan inay hubiyaan haddii helayso heshiiska ugu fiican, waxay kaala hadli doonaan isticmaalka korontota oo ay kuu sheegaan qorshayaal kasta ama taageerada aad heli karto si ay kuu caawiyaan.

Haddii ay deyn kugu leedahay shirkadaada korontada waxay kuu dejin karaan qorshe lacag bixin oo tixgelinaya duruufahaaga shaqsiyeed iyo awooddaada inaad bixiso. Sida ugu dhaqsaha badan ee ula xariirto waxaa fududaanaya sida ugu dhaqsaha badan ee ay kuu caawin karto.

# QAADO MITIRKA KORONTADA AKHRIYA EE CAADIGA AH

Waxaa jira noocyo kala duwan oo mitir ah, iyadoo ku xiran sida aad u bixiso kharashka korantadaada ama gaaskaaga. Haddii aad haysato mitir deyn ah oo aad hesho biil waxaa lagaa codsan doonaa inaad soo gudbiso akhriska mitir ee korantada iyo gaaska.

Haddii aad hesho biil ay ku qoran tahay 'E' marka aad eegto akhriska mitirka, tani waxay ka dhigan tahay in kharashka mitirka ay shirkadaadu qiyaastay lagana yaabo inaysan sax ahayn. Akhrinta la qiyaasay waxay keeni kartaa kharashaad badan oo aan la fileynin sidaa darteed waa inaad si joogto ah u soo gudbisaa akhriska saxda ah.




Mitirada waxaa loo akhri-yaa bidix ilaa midig. Ha ku darin lambaro casaan ah ama lambaro ku jira bokis casaan ah.

Tallo muhiim ah: qaado sawir ka mid ah mitirkaaga si aad u diiwaangeliso akhriska sax ah.

# DIIWAANADA MUDNAANTA LEH

**Shirkadaha korontada**
Dhammaan shirkadaha korontada ee Northern Ireland waxay leeyihiin Diiwaanka Daryeelka Macaamiisha. Waxay bixiyaan adeegyo taageero oo kala duwan oo loogu talagalay macaamiisha nugul, oo ay ku jiraan haddii aad:

- ku jirto da'da hawlgabka;
- aad tahay naafo ama qabto xanuunada joogtada ah;
- qabto ciladaha maqalka ama ciladaha araga ama baahiyo isgaarsiineed oo dheeraad ah.

Taageero ballaaran ayaa la heli karaa. La xiriir shirkadaada korontada si aad u diiwaangeliso oo aad u ogaato taageerada ay bixin karaan.

**Shaqaalaha Shabakadda Degmada**
Qof kasta oo ku tiirsan korantada si uu ugu maareeyo baahiyaha daryeel-ka caafimaadka, waxay ku biiri karaan Shabakada Korontada ee Northern Ireland (Northern Ireland Electric-ity Networks, NIEN) gaar ahaan Diiwaanka Daryeelka Macaamiisha Caafimaadka si ay u helaan taageero dheeraad ah inta lagu jiro mudada koronto la'aanta.

Haddii aad haysato qalab caafimaad oo gurigaaga yaala, sida qalabka neefta, joodari khaas ah, nidaamyada quudinta ama qalabka wax lagu qaa-di, waxaad iska diiwaangelin kartaa si aad u hesho macluumaadka casriga ah ee taleefanka inta lagu jiro mud-dada korontadu maqan tahay ama hakinta qorshaysan ee korontadaada. Booqo **www.nienetworks.co.uk/help-advice/vulnerable-customers/customer-care-register**.

# GURIGA SI AMMAAN AH U JOOG

**KAARBOON MONOXIDE WAA GAAS DILAA AH OO AAN LA ARKI KARIN, LA DHADHAMIN KARIN, AMA LA BAARI KARIN. CALAAMADAHA JOOGTADA AH WAA:**

- **Holaca gaaska oo oranji ama jaalle noqdo halkii uu baluug ka ahaan lahaa**
- **Mirir ka muuqata gudaha ama korka qalabka**
- **Dhuxusha ama alwaax si tartiib ah u gubanaya ama usoo baxaya**

Haddii aad tahay mulkiilaha guriga waxaad xaq u yeelan kartaa kormeerka badqabka gaaska oo bilaash ah oo ku saabsan kuleylka gaaska iyo qalabka. Ka hubi shirkadaada u-qalmitaanka. Hubinta badqabka badel uma ahan in qalabka gaaska si joogto ah loo eego.

Haddii aad uriso gaas ama aad ka walwalsan tahay badqabka gaaska, wac Adeegga Gurmadka Gaaska ee Northern Ireland ood ka wici karto 24 0800 002 001.


CHARITY REGISTRATION NO. 290511

# HAKU DHUMIN LACAG

Xaqiiji inaad helayso dhammaan dheefaha aad u qalanto inaad. Tani waxaa loo yaqaanaa 'kordhinta dakhliga'. Kaliya ma kordhinnayso dakhligaaga, waxay furi kartaa helitaanka dheefo kale. Waa khuraafaad joogto ah inay tahay inaad ka maqnaato shaqada si aad ugu qalanto – waxaa jira dheefooyin badan oo shaqo sidoo kale, sidaas darteed waxaa habboon in la sameeyo hubin oonleen ah. Kaliya waxay qaadataa qiyaastii 10 daqiiqo si aad u hubiso **www.gov.uk/benefits-calculators**.

## Khidmadaha wicitaanka

Tirada 0800 iyo 0808 waa lacag la'aan marka la adeegsado khadadka iyo moobeelada. Heerarka caadiga ah waxay khuseeyaan lambarada 01, 02 iyo 03 (sida caadiga ah 9p-13p daqiiqaddii marka la eego khadadka iyo 3p-55p marka la eego moobeelada iyadoo ku xiran shabakadaada). Inta badan waxaa lagu daraa xirmooyinka wicitaanka bilaashka ah. Eeg **www.gov.uk/call-charges**.

Haddii aad jeclaan lahayd inaad hesho taageero dheeraad ah adoo hubinaya xuquuqdaada ama sheegashada dheef-ta, ururada soo socda ayaa kaa caawin kara:

**Tallooyinka NI**
Khadka Caawimaada Tallooyinka: 0800 915 4604
Iimaylka: advice@adviceni.net

**Samee Wicitaanka**
Adeeggu wuxuu hubiyaa inaad hesho dhammaan faa'iidooyinka, adeegyada iyo taageerada aad xaqa u leedahay.
Taleefanka: 0800 232 1271
Iimaylka: makethecall@dfcni.gov.uk

**NI – Adeegga Taageerada Maaliyadda**
Haddii aad la kulanto dhibaato dhaqaale waxaad codsan kartaa Taageerada Ku meel gaarka ah ama Hormarinta Faa'iidooyinka Muddada Gaaban. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan waxa taageeradaan kaa caawin karto booqo – **www.nidirect.gov.uk/campaigns/finance-support**.



# QIIMO DHIMISTA KORONTADA IYO LACAG BIXINTA

## LACAGTA SHIDAALKA QABOOBAHA

**Lacagta Shidaalka Qaboobaha ee 2025 ilaa 2026** waxaa loo heli doonaa qof walba oo degan Northern Ireland **dhashayna kahor 22 dii Sebteembar 1959**, ilaa inaad doorato maahee inaadan helin.

Waxaad heli kartaa inta **dhexeysa £100 iyo £300** si lagaaga caawiyo inaad ku bixiso kharashka kuleylka qaboobaha. Uma baahnid inaaad wax sameyso – Lacagta waxaa loo bixin doonaa si ootamaatiga ah.

Laguuma soo diri doono qoraal ama iimayl lagaaga codsanaayo xogta banki-gaaga.

Haddii dakhligaaga ka sareeyo £35,000, Lacagtaada Shidaalka Qaboobaha waxaa la heli doonaa hadhow ayadoo loo maraayo HMRC.

Xog dheeraad ah ayaa laga heli karaa halkaan **www.gov.uk/winter-fuel-payment**.

Taleefanka: **0800 731 0160**

## LACAG BIXINTA CIMILADA QABOOBAHA

**£25 asbuuc kasta oo loo qalmo**

Qoysaska qaarkood waxay xaq u yeelan karaan Lacag Bixinta Cimilada Qaboobaha ee £ 25 usbuuc kasta oo u qalma. Tan waxaa si ootomaatig ah loogu bixiyaa kuwa ku jira dheefaha qaarkood marka celceliska heerkulka aaggooda la diiwaangeliyo, ama la saadaaliyo inuu yahay, eber digrii Celsius ama ka hooseeya todoba maalmood oo isku xigxiga. Waxaad heli doontaa £25 muddo kasta oo toddoba maalmood ah oo ay jirto cimilo aad u qaboow inta u dhexeysa 1 Nufeembar iyo 31 Maarso.

# WAXTARKA KORONTADA


Sida ugu hufan ee aad u isticmaasho korontada, waxaa yaraanaya inta jeer ee aad ugu baahan tahay inaad u adeegsato inaad isku diiriso, badqabka iyo badqabka guriga. La xiriir NEA NI si aad u hesho xaashiyadeena, oo ay ku jiraan tallooyinka keydinta korontada. Iimaylka: northern.ireland@nea.org.uk.

Waxaa laga yaabaa inaad xaq u leedahay xakameynta bilaashka ah ama dhimis ama tallaabooyinka kuleylka. La xiriir NI Energy Advice. Waxay bixiyaan tallo koronto oo bilaash ah, madaxbanaan oo aan kala go'lahayn oo loogu talagalay qoysaska guriga ee NI – oo ay ku jiraan tallooyin ku saabsan deeqaha korontada iyo ilaha kale ee caawimaada.
Taleefanka Bilaashka ah: 0800 111 4455
Iimaylka: nienergyadvice@nihe.gov.uk
Webseedka: **www.nihe.gov.uk/energy**


**Ka dhigida gurigaaga mid hela koronto ku filan sida ugu macquulsan waa habka ugu wanaagsan ee aad u yareyn karto kharashkaaga oo aad uga dhigi karto gurigaaga mid diirran. Waxaa jira qaar ka mid ah ficillo qiimo jaban, oo degdeg ah oo aad sameyn karto sida:**



**Albaabada iyo daaqadaha hawa xira – ka hel alaabaha dukaankaaga DIY ee deegaanka.**



**Qalabka kuleyka soo jiida waxay keeni karaan in qolkaagu helo kuleyl badan.**



**Xir daahyada si hawadu u xiran qolkuna u noqdo kuleyl.**

Haddii aad kireysato gurigaaga Northern Ireland, mulkiileyaashu waxay leeyihiin mas'uuliyado gaar ah si loo hubiyo in guryaha la kireystay ay yihiin kuwo ammaan ah, degan oo buuxiya heerarka sharciga ah. Arrintaan waxaa ka mid ah bixinta Ogeysiiska Macluumaadka Kirada, hubinta gaaska iyo badqabka korantada, iyo diiwaangelinta Qorshaha Diiwaangelinta Mulkiilaha.

Haddii aad ka walwalsan tahay in gurigaagu uusan ammaan ahayn oo mulkiiluhu uusan wax ka qaban walaacaaga, waxaad la xiriiri kartaa sarkaalka caafimaadka deegaanka ee gollaha deegaanka: **www.nidirect.gov.uk/contacts/local-councils-in-northern-ireland**.

# GUURISTA GURIGA IYO TAMARKAAGA

## USOO GUURISTA GURIGA

**Yaa bixiya korontadayda?**

Wac Shabakada NIE Networks adoo wacaya **03457 643 643**; waxaad u baahan kartaa MPRN (lambarka 17-ka god leh) ee ku qoran xaashida kharashka korontada. Si aad ula sii joogto shirkadaada korontada, la xariir oo u sheeg xogta mitirka ee cusub si aad uga hortagto in lagugu dalaco kharashkii hore.

**Yaa bixiya gaaskayga?**

Eeg biilka gaaska ama xaashida kharashka. Sidoo kale waxaad la xariiri kartaa shirkada shaqada gacanta ku haysta ee deegaanka:

- **Greater Belfast/Larne:** Phoenix Energy – **03454 55 55 55**
- **Ten Towns area:** firmus energy – **0330 024 9000**
- **Gas to the West area:** SGN Natural Gas – **0800 975 7774**

Ma waxaa dooneysaa inaad badesho shirkadaada? Booqo **www.consumercouncil.org.uk** si aad u hesho fursadaha ugu fiican.

## KA GUURISTA GURIGA

U sheeg shirkadaada ugu yaraan **labo maalmood oo ah kuwa shaqada** kahor inta aadan guurin si aan lagugu dalicin kharash dheeraad ah, Bixi:

- **Lambarka akoonkaaga** (ee ku qoran biilkaaga)
- **Lambarkaaga MPRN/GPRN** (lambarka 17-ka god ah, sidoo kale ku qoran biilkaaga)
- **Taariikhda aad guureyso**
- **Xogta mitirka ee ugu dambeysay** ee maalinta aad guureyso – sawir ka qaad
- **Ciwaanka aad u Wareegeyso** (biilkaagii ugu dambeeyay ama lacag celin kasta)


**U sheeg mulkiilaha gurigaaga ama qofka cusub ee degaya guriga**

- Haddii guriga kiro yahay ama aad iibineyso, u sheeg mulkiilahaaga ama qofka cusub ee degaya inaad xirtay akoonka.
- Waxay u baahan doonaan inay diiwaangeliyaan shirkada ay doortaan ayadoo isticmaalaya MPRN-ka dhismaha.

# WAXA LA SAMEEYO HADDII SHIRKADAADA KORONTADA SHAQADA GANACSIGA ISKAGA BAXDO

Haddii shirkadaada korontada ganacsiga iskaga baxdo, Waaxda Xakameysa Korontada Northern Ireland ayaa si ootamaatig ah kuugu wareejin doonta shirkad cusub muddo dhowr asbuuc ah. Ha iskudayin inaad wax isbadelo ah ku sameyso korontadaada ilaa inta akoonkaaga shirkada cusub loo wareejinaayo. Waxaa laga yaabaa inay kugu adkaato inaad hesho lacagaha aad leedahay haddii aad isbadelo sameyso xili hore. Sug inta shirkadaada cusub kula soo xariirayso.

## Inta aad sugeyso:



**Hayso xogta mitirka iyo sawirka aad ka qaaday.**



**Hay kharash koronto oo aad haysato – kuwaan waxay kaa caawin karaan in la an-sixiyo biilashaadii hore, inaad hesho lacagta ama deynta.**



**Ablikeeshinkaaga kasoo degso biil kasta haddii aad haysato akoon oonleen ah.**



**Meel ku qor haraadiga akoonkaaga – waxaad xogtaan ka heli doontaa bayaanka kharashka ee ugu dambeeyay.**

Shirkadaada cusub waxay kusoo diri doontaa warqad ay kuugu sheegeyso marka akoonka cusub la abuuray. Waa inaad la xariirto shirkada cusub haddii aadan fariin ka helin muddo labo asbuuc ah. Shirkadaada cusub waxay ku gelin doontaa nidaam canshuur oo cusub sidaas oowgeed la hadal si ay mid raqiis ah kuu geliyaan. Waad badeli kartaa adoon wax kharash ah bixin haddii aadan jeclaysan shirkada cusub ama canshuurta.

Si aad u hesho xog dheeraad ah, booqo:
Shirkada Xakameysa Koronta Northern Ireland
Webseedka: **www.uregni.gov.uk**

Guddiga Macaamiisha Northern Ireland
Webseedka: **www.consumercouncil.org.uk**

# ILAHA FAA'IIDO LEH IYO KHADADKA CAAWIMAADA

Halkaan hoose waxaad ka heleysaa liiska ururada ku xusan warqada oo dhan iyo qaar ka mid ah ururrada kale ee laga yaabo inay kaa caawin karaan arrintaan:

## MACMIILKA

**GOLLAHA MACAAMIISHA EE NORTHERN IRELAND (CCNI)** waa hay'ada sharciga ah ee macaamiisha ee Northern Ireland. CCNI waxay bixisaa tallo iyo macluumaad, baaritaan iyo xallinta cabashooyinka, waxayna kugu matalaan doodaha. CCNI waxay daabacdaa shaxda isbarbardhiga korontada ee la cusbooneysiiyay waxayna leedahay qalab isbarbardhiga qiimaha.
Booqo **www.consumercouncil.org.uk**.
Taleefanka: **028 9025 1600**
Iimaylka: **info@consumercouncil.org.uk**

## TALLOOYINKA DHEEFAHA IYO DEYNTA

Hubso inaad dalbato dheefaha saxda ah. Tani waxay kordhin kartaa dakhligaaga iyo sidoo kale waxay kaa dhigi kartaa inaad u qalanto caawimaad kale. Ka qaado tallooyinka ururada soo socda:

**ADVICE NI** waxay bixisaa tallooyinka dhefaha iyo deynta.
Khadka Caawimaada Tallooyinka: **0800 915 4604**
Iimaylka: **advice@adviceni.net**

**MAKE THE CALL SERVICE**
adeeggu wuxuu hubiyaa inaad hesho dhammaan dheefaha, adeegyada iyo taageerada aad xaqa u leedahay.
Taleefanka: **0800 232 1271**
Iimaylka: **makethecall@dfcni.gov.uk**

## WAXTARKA KORONTADA

**NI ENERGY ADVICE**
waxay siisaa talo bixin aan kala go'lahayn oo bilaash ah qoysaska guriga ku nool si ay ugala talliso xakamaynta iyo qorshayaasha kuleylka iyo ilaha kale ee caawimaada.
Taleefanka Bilaashka ah: **0800 111 4455**
Iimaylka: **nienergyadvice@nihe.gov.uk**
Webseedka: **www.nihe.gov.uk/energy**

**ENERGY SAVING TRUST**
waxay bixisaa hagitaan ku saabsan siyaabaha loo badbaadiyo korontada guriga ku jirta. Booqo boggooda **www.energysavingtrust.org.uk**.

# LIGHTNING REACH

Barta badqabka ah ee Lightning Reach waxay kuu oggolaanaysaa inaad codsato taageero ka timid bixiyeyaasha badan. Booqo **www.lightningreach.org**.

## GARGAARKA CUNTADA EE DEGDEGA AH IYO TAAGEERADA DHIBAATADA

Si aad u hesho deeqda cuntada ee deegaanka, waxaa laga yaabaa inaad u baahan tahay gudbin ay sameyso hay'ad deegaan-ka kajirta, dhakhtarkaaga ama booqdaha caafimaad-ka, adeegyada bulshada ama sarkaalka gurigaaga. Waxay ku siin doonaan boono muujinaysa inaad cunto ku wareejin karto meelaha cuntada deeqda ah lagu kaydiyo.
Si aad u ogaato meesha aad ka heli karto kaydadka deeqda cuntada iyo kaydka cuntada ee kuugu dhow booqo **www.trussell.org.uk/emergency-food/get-a-food-voucher**.

Barnaamijyada taleefanada casriga ah sida **OLIO** iyo **TooGoodToGo** ayaa kuu sheegi doona marka cuntada lagu iibiyo qiimo jaban oo kuu dhow.

## SALIIDA KULEYLKA GURIGA

Saliidu way ka duwan tahay gaaska dabiiciga ah iyo korantada waxaana badanaa la keenaa ayadoo badan. Waxaa jira habab badan oo lacag bix-in, iyo tiro badan oo shirkad ah ayaana bixiya qorshayaal keydin oo dabacsan. Ka hubi shirkadaada hababka la heli karo.
Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah **Gollaha Macaamiisha** oo ku saabsan isbadellada toddobaad-laha ah ee qiimaha saliidda kuleylka guriga: **www.consumercouncil.org.uk/home-heating/price-checker**.

**Shabakadda Kaydka Saliida ee NIHE**
Ma xaadeyn ugu biireyn NI Housing (NIHE) ee ah Shabakada Kaydka Shidaalka?
Waxaad ku raaxeysan kartaa qiimo dhimista xubinimada haddii Shab-akadda NIHE Oil Savings Network ay leedahay shirkad diiwaangashan oo daboolaysa koodhkaaga boostada. Waxaad ka hubin kartaa kooxdooda **NIenergyadvice@nihe.gov.uk**.



# ILAHA FAA'IIDO LEH IYO KHADADKA CAAWIMAADA

## BADQABKA

**HADDII UU KUU URO GAAS**, aad dooneyso inaad soo sheegto gaas daadanaya ama aad u baahan tahay adeegyada gargaarka degdegga ah ee gaaska, waxaa jira Khadka Gargaarka Degdegga ah ee Gaaska oo bilaash ah, oo shaqeeya 24 saac aadna ka wici karto **0800 002 001**.

Haddii korontadu kaa tagto ama aad walaac badqab ka qabto mitirka, fiilooyin ama qalab kale oo soo galaya guriga, markaas la xiriir Shabakadaha Korantada Northern Ireland (NIE) oo lambarkooda taleefanka degdegga ah uu yahay: **03457 643 643**.

## HADDII AAD U BAAHAN TAHAY TAAGEERO DHEERAAD AH, URURADA SOO SOCDA AYAA KAA CAAWIN KARA

**NI Energy Advice**
Taleefanka bilaashka
ah ee: 0800 111 4455
nienergyadvice@nihe.gov.uk

**Tallooyinka NI**
Taleefanka Bilaashka
ah: 0800 915 4604
www.adviceni.net

**Gollaha Macaamiisha Northern Ireland**
Taleefanka Bilaashka
ah: 0800 121 6022
www.consumercouncil.org.uk

**National Energy Action Northern Ireland**
Taleefanka: 028 9023 9909
northern.ireland@nea.org.uk

Accessibility & Language

Waxaad u turjumi kartaa webseedka iyo xaashiyaha National Energy Action in ka badan 160 luuqadood – waxaadna ka heli kartaa qoraallo isku badelaaya hadal oo ku baxaya in ka badan 100. Waxaad sidoo kale la qabsan kartaa qoraalka ku habboon nidaamka fahamka, oo ay ku jiraan kuwa ADHD iyo dyslexia, iyo itaaldarada araga. Isticmaal badhankeena **Recite Me** ood ka helayso www.nea.org.uk.

**National Energy Action waa hay'ad samafalka ee kahortaga shidaal la'aanta qaranka, kaas oo ka caawinaya qof walba inuu helo guri diiran, ammaan ah oo caafimaad qaba. Booqo www.nea.org.uk.**

© National Energy Action Abrii 2026, lambarka diiwaanka samafalka 290511.
Shirkada waxaa xadida oo dhowr damaanad. Waxay ka diiwaangashan yahay England iyo Wales lambarkeeduna waa: 01853927.